

Waalika/Mas'uulka ilmaha ee sharafta leh,

Maamulka dugsiyada ee Bloomington waxa ay sanadakiiba laba jeer soo saaraan warbixin la xiriirta horumarka ardayga taasoo ah mid ka mid h habka loola socon karo horumarka ardayga ee dugsiya. Warbixinta ardayga waxaa si cad looga dheehan karaa heerka waxbarashada ee ardayga marka lala bardiho manhajka wabarashada iyo meelaha uu ardeygu ku wanaagsan yahay, meelaha uu darajada sare ka keenay iyo meelaha uu u baahan yahay in laga caawiyo dhamaadka sanad dugsiyeedka.

Heerka ardeyga waxaa lagu muujiyey qiyaasta ee aasaaska ee lagula socdo heerka laga doonayo. Heerka waa odhaah muujienysa waxyaabaha ay waajibka tahay in ay ardaydu garanayaan si ay uga gudbaan **dhamaadka sanadka**. Ardaydu intooda kaama soo baxayaan waxyaabaha laga doonayo in la gaaro dhamaadka sanad dugsiyeedka bilaha ugu horeeya.

ELEMENTARY STANDARDS	
	Term
	S2
ENGLISH LANGUAGE ARTS	Subject
READING: LITERATURE	Strand
Ask and answer questions about key details and ideas in a text.	
Retell stories, including key details, and demonstrate understanding of their central message or lesson.	Benchmark
Describe characters, settings, and major events in a story, using key details.	
Use illustrations and details in a story to describe its characters, setting, or events.	

Sanadka oo dhan, macalimiintu waxa ay isticmaalaan habab qiimeyn oo kala duwan oo ay ku cabiraan horumarka ardeyga iyada la raacayo heerarkaas iyo warbixinta horumarka ardayga ee darajooyinka soo socda:

Waxa uu marayaa heerkii laga doonayey (3): Ardaygu waxa uu muujiyey si joogta ah heerka laga doonayo fasalka uu ku jiro. Ardaygu waxa uu ka soo bxi karaa waxyaabaha laga doonayo dhamadka sanadka si sax ah isaga oo madax banaan.

Waxa uu baranayaa xirfadaha laga doonayo (2): Ardaygu waxa uu soo bandhigay qeyb ahaan aqoonta laga doonayo iyo xirfadaha laga filayo ee fasalka uu dhigto. Horumarka waa ku kala duwan yihiin ee ku saabsan sax u qabashada iyo si madax banaan. Waxaa laga yaabaa in waajib looga dhigo inuu helo gargaar si uu u gaaro heerka laga doonayo si uu u gaaro heerka waxbarashada ee sanad dugsiyeedka

Xirfadaha Assaasiga ah (1): Ardaygu waxa uu soo bandhigay aqoon iyo xirfado kooban oo la xiriira fasalka uu dhigto. Ardaygan waxa uu u baahan taageero aad u balaaran waxaana laga yaabaa in weli ka shaqeynayo xirfadaha horudhaca ah si uu u gaaro heerka laga doonayo.

Meelaha qaarkood, dhibcaha ugu sareeya ee warbixinta heerka caadiga ah waa 3. Qof maraya heerkii laga doonayey. Xaaladaha kale, waxaa laga yaabaa in ardaygu soo bandhigo faham aad u sareeya iyo isticmaalka aqoonta iyo xirfadaha laga filayo darajada uu markaas ku jiro iyo sidoo kale fahamka fikradaha ka baxsan casharada ee ku adag fasalka uu dhigto. Marka ay xaaladdu sidaas tahay, waxaa laga yaabaa in ardayga la siiyo darajo ah **Inuu ka sareeyo heerka laga filayey (4)**.

Haddii aad su'aal ka qabto darajada ama horumarka uu sameynayo ilmahaaga, fadlan la soo xiriir macalinka ilmahaaga. Haddii aad qabtow ax su'aal ah oo ku saabsan heerka fasalka ardayga iyo warbixinta, fadlan soo booq bogga internetka ee Manhajka Dugsiya Dhexe iyo Habka Barista ee bloomingtonschools.org/elem-curriculum.